# OGAYSIIS MACMIILKA

## Bakteeriyada Total Coliform ee ku jirta Biyaha la Cabbo

Kormeerka joogtada ah ee biyaha ayaa lagu ogaaday in bakteeriyada total coliform ay ku jirto ilaha biyaha la cabbo. Macmiil ahaan waxa aad xaq u leedahay in aad ogaato waxa ay tani ka dhigan tahay, waxa ay tahay in aad samayso, iyo waxa la samaynayo si loo saxo xaalada. Ogaysiiskani waa inuu kugu wargeliyo xaalada oo uu kuu ogolaado inaad samayso talaabooyin aad dareensan tahay inay ku haboonyihiin.

### Maxay tani ka dhigan tahay?

- **Tani ma aha xaalad degdeg ah.**
- Xeerarka lagu maamulo nidaamyada biyaha dadweynaha ayaa waxay u baahanyihiin in ilaha biyaha si joogto ah looga baaro bakteeriyada total coliform. Baaritaankii ugu dambeeyay ayaa laga helay bakteeriyadan nidaamka biyaha la cabbo.
- Bakteeriyada total coliform ma aha in ay ku jirto biyaha oo in biyaha laga helayna waxa ay muujinaysaa dariiqyada suurtogalka ah ee in wasakh ay soo gasho biyaha la cabbo.
- Bakteeriyada Total coliform guud ahaan ma leh waxyeelo waxayna si dabiici ah ugu jirtaa deegaanka. Waxa loo adeegsadaa tilmaame ahaan in noole kale ee waxyeelo leh, oo ay ku jiraan bakteeriya iyo fayrasyo, ay dhici karto in ay joogaan.
- *Bakteeriyada E. coli,* oo ah koox ka mid ah bakteeriyada waxyeelada leh, ayaa sidoo kale laga baaray oo **aan laga helin** ilaha biyaheena.

### Maxaan u Baahanahay Inaan Sameeyo?

- **Waad cabi kartaan biyaha.** Si kastaba ha ahaatee, haddii aad qabto walaacyo caafimaad oo gaar ah, waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad tixgeliso inaad raadsato ilo kale oo biyo ah.
- Dadka difaaca jirkooodu hooseeyo, dadka waayeelka ah, haweenka uurka leh, iyo carruurta ayaa laga yaabaa inay halis dheeraad ah ugu jiraan haddii cudur-sidaha biyaha ka dhasha ee khatarta ah ay ku jiraan ilaha biyaha.
- Haddii nidaamka biyaha lagu daweynayo heerar sarreeya oo koloriin ah (tusaale, shoog-garaynta koloriinta), waxaa lagugu soo ogeysiin doonaa inaad iska ilaaliso u isticmaalka biyaha ujeedo kasta ilaa heerka koloriinta ee biyuhu laga go'aamiyo inay badbaado tahay.

### Maxaa La Samaynayaa?

- Waxaanu la shaqeyneynaa Waaxda Caafimaadka ee Minnesota (MDH) ama hay'ada caafimaadka ee deegaanka si aanu u baarno sababta suurtagalka ah ee in ay ku jirto bakteeriyada total coliform ilaha biyaha. Tan waxaa ka mid ah in la qiimeeyo dhammaan nidaamka biyaha la cabbo si loo go'aamiyo waxa u sababay soo gelitaanka wasakhowga iyo in la saxo wixii dhibaato ah ee la aqoonsaday intii lagu jiray baaritaanka.
- Nidaamka bakteeriyada ayaa laga nadiifin doonaa iyo/ama waa la biyo raacin doonaa, oo ay ku xigto in lagu sameeyo baaritaan dheeraad ah.
- Waxaanu sii wadi doonaa la shaqaynta MDH ama wakaalada caafimaadka deegaanka ilaa xaaladan la xalinayo.

### Halkee laga heli karaa Macluumaad Dheeraad ah?

- Waxaad la soo xiriiri kartaa ______________________ oo laga helayo____________________ si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah.

# Tilmaamaha Ogeysiiska Macaamilka ee loogu talagalay Bakteeriyada Total Coliform

## Goorma ayaan isticmaalaa ogeysiiskan?

- Ogeysiiskan Dadweynaha waa in la isticmaalo marka la xaqiijiyey in laga helay bakteeriyada total coliform ilaha biyaha.
- Ogeysiiskan waa **in aan** la isticmaalin marka *E. coli* laga helay.

## Sideen u isticmaalaa ogeysiiskan?

- Ogeysiiska waa in la buuxiyaa iyadoo la bixinayo magaca/lambarka taleefanka qofka lagala xiriirayo nidaamka biyaha dadweynaha.
- Nuqullada ogeysiiska waa in si muuqata loogu soo dhejiyo dhammaan goobaha ay dadku ka heli karaan biyaha la cabbo ee ilaha biyaha.
- Intaa waxaa dheer, xarumaha cuntada iyo cabitaanku waa in ay ku dhejiyaan ogeysiiska meelaha laga soo galo.
- Dhismayaasha hoyga ah waa inay ku bixiyaan ogeysiis meesha laga soo galo.

## Muddo intee dhan ayaa la iiga baaahanyahay in uu ii dhajisnaado ogeysiisku?

- Ogeysiiska(yada) waa in ay meesha dhejisnaadaan ilaa baaritaanku ka xaqiijinayo in bakteeriyada total coliform aysan hadda ku jirin nidaamka biyaha.
- Waxaa kugu soo wargelin doonta Waaxda Caafimaadka ee Minnesota (MDH) ama hay'adda caafimaadka deegaankaaga marka ogeysiisyada la fujin karo.

## Miyaa la iga rabaa in aan soo dhejiyo ogeysiiskan?

- Haa. MDH waxay u baahan tahay in ogeysiiskan la dhajiyo marka bakteeriyada total coliform laga helo nidaamyada biyaha dadweynaha ee aan bulshada ahayn.
- Isbeddelo waa in aan lagu samaynin nuxurka ku jira ogaysiiskan iyada oo aan la haysanin ogolaanshaha MDH ama wakaalada caafimaadka deegaankiina.

## Miyaa la iiga baahan yahay inaan bixiyo ilo kale oo biyo laga helo?

- Maya, looma baahna inaad siiso ilo kale oo biyo laga helo macaamiisha. Si kastaba ha ahaatee, MDH waxay si xoog leh **kuugu dhiirigelinaysaa** inaad bixiso biyo ganacsi ahaan loo caagadeeyey oo aad cabtaan ilaa biyihiina laga waayo bakteeriyada total coliform.
- Intaa waxaa dheer, waxaa lagu talinayaa in cuntada, cabitaanka, iyo xarumaha hoygu ay isticmaalaan biyaha ganacsi ahaan loo caagadeeyey, ama biyaha tuubada oo la karkariyey ugu yaraan hal daqiiqo, dhammaan diyaarinta cuntada.
- Isticmaalka barafka ganacsiga ah, miraha iyo khudaarta horay loo soo dhaqay, iyo cabitaanada dhalooyinka ku jira ama qasacadaysan ayaa sidoo kale lagu talinayaa.

Maarso 2016 RV 9/2021

health.noncommunitycompliance@state.mn.us

Si aad macluumaadkan ugu hesho qaab kale, soo wac 651-201-4700. Waxaa lagu daabacay warqad dib loo soo warshadeeyay.

DEPARTMENT OF HEALTH